

HENNEPIN COUNTY  
MINNESOTA



Yareynta kiimikada khatarta ah  
ee gurigaaga iyo waxyaabaha  
nadaafadda u fican

Reducing hazardous chemicals in your home  
and green cleaning recipes


# Waa maxay sababta ay muhiim u tahay in la yareeyo kiimikooyinka khatarta ah

Sida laga soo xigtay Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Mareykanka, keliya qayb yar oo ah kiimikooyinka la diiwaangeliyey ayaa soo mara baaritaan buuxa oo la xiriira welwelka caafimaadka dadweynaha. Kiimikooyinka qaarkood waxa ay leeyihii saameyn ah sun iyo degdeg. Balse waxaa jira qaar kale oo sun ku ah jirka ka dib marar badan muddo dheer la taabto. Maalmahan waxay u muuqataa in badeecad kasta ay la socoto digniin, sidaas awgeed waxaa laga yaabaa in aysan dadkuna akhrisan waraaqda ku dheggen alaabta. Hase ahaatee, marka la haysto alaabada khatarta ah, in la akhristo waraaqha ayaa ah sida wax lagu hubsan karo.

Carruurta iyo xayawaanka rabbaayadda ah ayey si aad u daran u saameeyaan kiimikooyinka. Noolaha soo koraaya, carruurta iyo xayawaanka rabbaayadda ah aad ayey u neefsadaan, oo dadka waaweyn ayey uga badan yihiin cabitaan kaiyo cuntada. Carruurtu markay ciyaaraayaan waa ay gurguurtaan oo afka ayey wax kasta geliyaan. Xayawaanku waxay cagahooda ku soo qaadan karaan kiimikooyin waxyeello badan, oo markas ayey afka gashtaan oo waa ay cunaan. Natijadu waxay noqoneysaa, in ay carruurta iyo xayawaanka rabbaayadda ah ku badan yihiin wasakh badan oo suurtagal ah.

## Siyaabaha ay kiimikooyinku kuu soo gaari karaan

Kiimikooyinku waxay jirka dadka ka soo geli karaan "meelo badan."



### Qiiqliqid

Waxay u gudbaan sambabka oo ay ka galaan sanka iyo/ama afka.

### Taabasho

Waxay gaaraan maqaarka, iyo/ama indhaha, sanka ama cunaha.

### Liquid

Waxay jirka ka galaan afka.

### Cirbad

Waxay dhiigga ka galaan xidid iyo meel jeexan ama ka duleesha maqaarka.

# Erayada digniinaha

Sharciga federaalka ayaa shuruud ka dhigayaax waxyabaha khatarta ah iyadoo la isticmaalayo ereyo digniin ah. Markaad fahamto sida ay u kala duwan yihiin isticmaalidda erayada seenyaalaha, waxaad go'aamin kartaa siday alaabtu khatar u tahay.

## Akhriso waraaqaha digniinta

Raadso erayada digniinta ee ku dul qoran alaabta oo soo iibso kuwa ugu khatarta yar

Khatar yaraan



Khatar badan

Erayada Digniinta	Heerka Khatarta
Taxaddar	Khatar fudud/dhexdhexaad ah
Digniin	Khatar dhexdhexaad
Khatar	Wax aad u guban kara, daxaleysanaya ama aad sun ah
Sun	Sun daran

## Heerarka khatarta ah ee alaabta guriga ee caadiga ah

### Taxaddar

- Amooniya
- Saabuunta weelka mashiinka
- Nadiifiye xoqid jilicsan
- Saabuunta dharka lagu dhaqdo
- Saabuunta nadiifiyaha nooc kasta

### Digniin

- Nadiifiyeeyasha shamiitada ee nooca baayn
- Dhalaalinta Barafka
- Nadiifiyaha mutuneelka musquusha

### Khatar

- Dhalaaliyaha biraha
- Shidaalka fudud
- Shamiitada cinjirka ah
- Nadiifiyaha foornada
- Nadiifiyaha bullacadda
- Warankiilada kolorii

### Sun

- Lye
- Sunta jiirka/doolliga
- Buufiska quraanjadu/cayayaanka



## Ka yaree kiimikooyinka halista ah gurigaaga

- Soo iibso wax yar oo ka mid ah alaabada khatarta ah ee guriga adigoo sida soo socota u sameysanaya nadiifyeyaa gaar kuu ah.
- Kabaha ku soo bixi albaabka gurigaaga si aadan kiimikooyinka ula dhax gelin gurigaaga oo dhan.
- Iisticmaal alaabta buufiska ah sababtoo ah hawadu ceeryaamada ayey u dhexgashaa si fudud.
- Ka fogow kiimikooyinka hawada lagu carfiyo iyo shumacyada.
- Ka fogow kiimikooyinkii hore ee loo isticmaali jiray labandaayada.
- Ka fogow sunta cayayaanka kiimikada ah iyo sunta dhirta disha.

## Talooyinka keydinta badqabidda leh

- Ka fogee carruurta iyo xayawaanka in ay kiimikooyinku gaaraan.
- Alaabta markay ku qoran tahay "yeysan barafoobin" ilaalso (sida rinjiga cinjirka ah) ee gudaha albaabbada.
- Waligaa ha isku darin kiimikooyinka (sida warankilo iyo amooniya).
- Alaabta kiimikada ah ka fogee meelaha dabka ah.
- Keliya soo iibso alaabta aad isticmaali doonto.
- Alaabta ku hayso weelka asal ah oo hubso in qoraalkiisa la akhrin karo.

## Si badqabid leh u tuur qashinka khatarta ku ah guriga

Sida aan fiicneyn ee loo tuurayo qashinka khatarta ah ee guriga, sida in lagu tuuro qashinka ama lagu shubo bullaacadaha ama bullaacadda duufaanta, waxay dhaawici karaan qoyska, dadka qashinka qaada, ama deegaanka.

Qashinka khatarta ah ee ka yimaada guryaha waxaa ka mid ah alaabta baaburta, nadiifyeyaasha, cawska iyo alaabta beerta, alaabta ay ku jirto meerkurida, rinji, wasakh, rinji khafifiyeyaa, iyo sunta sunta lagu dilo cayayaanka.

Xarumaha Qashinka ee Degmada Hennepin ayaa la keeni karaa alaabtaas. Waxa kale oo la keeni karaa xilliyada uruurinta qashinka la tuuro. Faahfaahinta qashinka khatarta ah ka eego:



[hennepin.us/green-disposal-guide/  
household-hazardous-waste](http://hennepin.us/green-disposal-guide/household-hazardous-waste)

# Nadiifinta caafimaadka u fican

Waxaad ku ilaalin kartaa caafimaadkaaga iyo caafimaadka qoyska, xayawaanka iyo deegaanka adigoo wax u nadiifsanaya oo leh waxyaboo fudud oo aan sun ahayn. Badeecoyin badan oo caadi ah oo guriga yaaalla, sida budada nadiifinta ee beykin soodha, liin, khal iyo saabuunta mashiinka alaabta, aya noqonaya nadiifyeeyaa waxtar leh oo qjimo jaban.

## Qalabka nadiifinta aasaasiga ah

- Budada nadiifinta
- Liin miiran
- Budada dhaqdhaqista
- Khalka cad
- Nadiifinta bullaacadaha
- Dhagaxa nadiifinta



## Talooyin iyo tab

- Isku qas nadiifyeeyasha guriga oo kala qeybsó.
- Calaamadee weelasha nadiifyeeyasha, isticmaalkooda iyo taariikhdií la soo sameeyey.
- Nadiifyeeyasha ka fogee meelaha ay gaarayaan carruurta iyo xayawaanka.
- Weelasha nadiifyeeyasha xir markaadan isticmaalin.
- Weligaa ha u isticmaalin weel cunto ama cabitaan si aad ugu nadiifiso kiimikooyinka nooc kasta oo ay yihiin.
- Ku hubso alaabta meel yar si aad u tijaabiso midabkooda (rooggaa iyo wasakhda dharka laga gooyo). Khalku waxa uu midabka ka saari karaa alaabta qaarkood.

# Waxyaabaha aasaasiga ah iyo isticmaalka saabuunaha nadiifinta

## Budada nadiifinta (soodhiyum baayo-kaarbooneyt)

- Wuxuu ur lahayn
- Waxyaabaha lagu dilo funguska
- Carfiyeeyaal
- Goynta wasakhda marka lagu qaso biyo diirran
- Dhar jilciyeyasha marka lagu dilo wareegga biyo-raacinta
- Dhalaaliyeeyaal – waxay goysaa wasakhda dharka oo aan is beddelin



## Liin ama liin miiran

- Urtu waxay astaan u tahay nadaafadda
- Aashitada – waxay laga helaa dilista bakteeriyyada/ jeermiska
- Goynta wasakhda – waa in lagu dhigo dhowr daqiqo



## Budada dhaqista dharka (soodhiyum baayo-kaarbooneyt)

- Si la mid ah dhardhaqista (laguma karsan karo cuntada)
- Wuxuu ur lahayn
- Goynta wasakhda – waxaa ku jira wax aan aaysiidh ahayn
- Jilciyaha biyaha - wuxuu u fiican yahay biyaha adag
- Nadiifinta mashiinka qaxwaha ama mutuneelka musquusha



## Khalka cad

- Jeermisdilaha
- Waxay dilaan caaryada ugu badan
- Carfiyeeyaal
- Baabi'iyaha haraaga liinta
- Bi'iyaha wasakhda
- Jilciyaha dharka marka lagu dilo saabuunta dharka lagu dhaqdo
- Waxaa loo isticmaala dilidda bakteeriyyada, caaryada iyo jeermiska



## Nadiifinta bullaacadaha

- Waxay fureysaa tuubooyinka xirma



## Dhagaxa nadiifinta

- Wuxuu calawga ka goysaa musqulaha

## Borax, warankiilo aan koloriin ahayn iyo budada wax lagu dhaqo



waxaa loo isticmaali karaa nadiifinta guriga iyo alaabta dharka lagu dhaqo sida ku dul qoran saabuunta. Waxyaabahaas waa kuwo waxyeello leh haddii la laqo. Budada nadiifinta lama mid aha tan wax lagu karsado oo waa in aan labadaas oo kala duwan la isku beddelin.

- Waa in loo isticmaalo oo keliya warankiilo aan koloriin ahayn haddii aad isticmaaleysa alaabta warankiilada. Iskeed u isticmaal.
- Ha isticmaalin warankiilo ama amooniya. Marna ha isku darin alaaboo kala duwan ama kala jaad ah.

# Kaarka qoraalka

## Nadiifyaha nooc kasta



## Nadiifyaha rooggaa



### Waxyaabaha sameyska

- $\frac{1}{4}$  koob ah khal cad
- Biyo
- $1\frac{1}{2}$  qaaddo ah saabuunta alaabta ee disha bakteeriyada
- Liin miiran (haddii la rabo)

### Habraacyo

In 16 oz. oo ah dhalada buufiska, ku darso khalka oo ka buuxi biyo. Ugu-dambeyn ku darso saabuunta alaabta. Ku darso liinta miiran haddii la rabo.

### Waxyaabaha sameyska

- $\frac{1}{2}$  koob oo khal ah
- 1 qaaddo oo ah saabuun dareere ah
- Istaraasho/maro cad oo biyaha lagu dhuuqo
- Biyo diirran

### Habraacyo

Baaquli iskula qaso khalka iyo saabuun

Intii suurtoobeysa istaraasho uga dhuuq qoyaanka meesha wasakheysan, ku biyoraaci biyo diirran oo mari dareeraha khalka iyo saabuunta, sug 15 daqiiqo, ka dibna istaraashada ku biyaraaci biyo nadiif ah oo ka tirtir.

*Waxyabaha sameyska*

## Nadiifyaha shamiitada (sida nooca alwaaxa ah)



*Habraacyo*

Isku qaso ½ koob oo ah khal cad iyo hal gaaloon oo biyo ah.

## Nadiifyaha foornada



*Waxyabaha sameyska*

- 1 koob ama wax ka badan budada nadiifinta
- 1 ama 2 qaado oo ah saabuunta weelka ee aan dileyn bakteeriyyada

*Habraacyo*

Ku daadi biyaha dhinaca hoose ee foornada, ka dibna ku dabool dufanka budada nadiifinta oo dusha sare oo dhan ha noqdo mid cad. Ku daadi ama ku buuifi biyo badan dhinaca sare. Hal habeen u daa. Ka masax subaxda dambe; dabadeedna xoogaa saabuun dareere ah kula nadiifi maro qoyan, ka dhaq haraaga foornada.

## Saabuunta weelka mashiinka



### Waxyaabaha sameyska

- $\frac{1}{4}$  koob oo ah budada wax lagu dhaqo
- 3 dhibcood oo ah saabuun aan ahayn nooca disha bakteeriyyada
- $\frac{1}{4}$  liin miiran (haddii la rabo)

### Habraacyo

Baaquli iyo qaaddo iskula qaso oo dhex gasho mashiinka saabuunta weelka. Saabuuntu waxay nadiifin doontaa hal mar oo ah weelal.

## Saabuunta dharka lagu dhaqdo



### Waxyaabaha sameyska

- 4 qaado oo ah borax
- 4 qaado oo ah budada nadiifinta
- 1 gaaloon oo ah biyo diirran
- $\frac{1}{4}$  liin miiran (haddii la rabo)
- 4 qaaddo oo ah saabuun aan dileyn bakteeriyyada

### Habraacyo

Isku dar biyo, borax, liin miiran iyo budada nadiifinta caag ah hal gaaloon.

Ku dar dareeraha mashiinka weelka ugu dambeyn, dabool oo rux ilaa ay isku darmaan. Istimmaal  $\frac{1}{4}$  koob halkii mar oo ah dhardhaqis.

## Jilcisada dharka



*Waxyabaha sameyska*

- 1 koob oo ah khal cad

*Habraacyo*

Ku dar hal mar oo ah dharka markaasna waxaad ku darsataa saabuunta mashiinka dharka.

## Nadiifiyaha godka musquusha



*Waxyabaha sameyska*

- 1 koob oo ah budada cad ee nadiifinta
- 1 koob oo ah khal cad
- 1 Dhagax oo ah nadiifinta
- 1 buraash oo ah nooca musquusha

*Habraacyo*

Ku daadi budada nadiifinta godka musquusha, dabadeedna khalka ku daadi oo ku xoq burushka musquusha.

Marka xigta, isticmaal dhagaxa si aad calawga uga saarto godka.

## Ka fur oo ah carfi bullaacadda



*Waxyaabaha sameyska*

- 6 oz oo ah budada nadiifinta
- 1 koob oo ah khal cad
- Nadiifinta bullaacadaha

*Habraacyo*

Ku daadi in badan oo ah oo  
budada nadiifinta gudaha iyo  
hareeraha duleelka bullaacadaha.  
La raac hal koob oo ah khal cad.  
Ku dhammee adiga oo ku dhaqaya  
biyo aad u kulul.  
Isticmaal saabuunta bullaacadaha  
si aad ugu furto godka xiran.  
Ku celi celi haddii aad rabto.

# Talooyin waxa loo iibsanayo

Haddii aad rabto in aad iibsato alaabta nadiifinta halkii aad adigu sameysan lahayd, waxaad yareyn kartaa in ay idin soo gaarto kiimikooyinka waxyeellada leh ee soo iibso alaabto khatar yar.

- Raadso alaabto muujineysa waxyabaha sameyska ah oo dhan. Guud ahaan, alaabta sameyska yar ayaa aad u fican.
- Iisticmaal nadiifiyaha wax kasta halkii aad ka iibsan lahayd nadiifiyeaal badan oo kala gaar ah.
- Dooro alaabta laga sameeyay geedaha sida liinta, miraha, khudaarta, geedaha daawada ah ama geedka baayn.
- Dooro alaabto aan lahayn dhibaatooyin ama aan kiimikeysneyn (VOCs). VOCs waa kiimikooyinka sunta ah oo hawada lagu sii daayo.
- Dooro alaabto aan koloriin lahayn.
- Dooro xabagta biyaha lagu isticmaalo, xabagta dhejiska ah iyo rinjiyo.
- Dooro alaabaha ugu sunta yar si aad wax ugu nadiifsato. Alaabada ay wax ku dul qoran yihiin Digniin waa ay ka khatar yar yihiin alaabta ay ku qoran yihiin Digniinta, Khatarta ama Sunta.
- Raadso alaabta leh shahaadooyinka bey'adda u fican:
  - Shahaadada Shaabbadda Cagaaran: Alaabadaas waxaa lagu soo qiimeeyey waxqabadkooda adag, caafimaadka iyo shuruudaha deegaanka.
  - Xulashada Badqabista EPA ee Mareykanka: Alaabta leh summadda Xulashada Badqabista waxay ka caawiyaan macaamiisha in ay wax iibsadaan ganacsiga alaabtoodoo leedahay kiimikooyin ammaan leh, iyadoo aan la hurin tayada ama waxqabadka.
- Faahfaahinta alaabta la iibsan karo:
  - Saldhigxogeedka Macluumaadka Alaabta Macaamiisha: [whatsinproducts.com](http://whatsinproducts.com)

